# 5 Waxyaabood oo Waxtar leh oo la Sameeyo Marka Aad Ogaato in Aad Qabto Kansar

1. **Ka fakar sida aad dooneyso in aad u isticmaasho waqtigaaga iyo xoogaaga.**
   - Tani waxa ay kaa gacan siinaysaa in aad samaysato dookhyo iyo qorshayaal.
2. **Waxaada isku dubarido.**
   - Haddii aad shaqeyso, ka codso waaxdaada HR nuqul ka mid ah kababkaaga.
   - Hel nuqulada naafonimadaada buuxda iyo siyaasadaha caymiska caafimaadka (si gaar ah u codso siyaasadda caymiska oo buuxda, ma aha oo kaliya soo koobidda, si aad ugu diyaargarowdo arrimo kasta oo mustaqbalka ah).
   - Xafid xusuus-qorka ballan kasta oo caafimaad iyo wicitaan kasta oo ku saabsan daryeelkaaga. Qor qofka halkaas joogay, wixi laga wada-hadlay, iyo faahfaahin kasta oo muhiim ah.
3. **Samee nidaam taageero.**
   - Marka asxaabta iyo qoysku ay damcaan in ay ku caawiyaan, ha ku caawiyaan.
   - Waxa ay kula imaan karaan ballamaha, sameyn karaan xusuus qor, waxayna maareyn karaan waraaqaha shaqada sida faahfaahinnada daawaynta iyo biilasha.
4. **Waa caadi in aad caawimaad codsato marki aad su'aalo qabto.**
   - Kooxdaada caafimaadka waxa ay kaa caawin karaan su'aalaha caafimaadka.
   - Su'aalaha kale, kala hadal HR-kaaga ama qofka qaabilsan kababka shaqada, wakiilka ururka, shaqaale bulsho oo jooga isbitaalkaaga ama rugtaada caafimaad, ama xubin wadaad diimeed ah.
   - Kaligaa ma tihid, dad badan ayaana kaa caawin kara in ay jawaabo kuu helaan.
   - Shaqaalaha bulshada ee ku sugan rugtaada caafimaad ayaa ah il wanaagsan oo laga helo xogta ku saabsan kheyraadka bulshada waxayna kaa caawin karaan codsiyada deeqda lacageed.
5. **Dadka aad jeceshahay kala hadal wixi ku saabsan rabitaanadaada.**
   - Buuxi foomka dardaaranka daryeelka caafimaadka si aad dookhyadaada u kala cadeyso.
   - Xaqiiji in dadka aad jeceshay ay og yihiin halka ay yaalaan dukumiintiyada muhiimka ah, sida dardaarankaaga daryeelka caafimaadka, dardaaranka, iyo awooda qareenka.